Helsinki
Helsingfors

Laanta sooshalka iyo caafimaadku waxay ogeysinaysaa
Social- och hälsovårdssektorn
Social Services and Health Care
Waxaa la cusboonaysiiyay 4.11.2020

246_Tietoa karanteenipäätöksen saaneelle
[somali]

Macluumaad loogu talagay qofka laga gaaray go’aanka karaantiilka

Waxaan ogaanay in aad u dagantahay qof uu ku dhacay cudurka fayruska Korona ee COVID-19 sababtaas darteed ayaana karaantiil laguu geliyay. Karantiil waxaa loola jeedaa xadaynta xorriyadda dhaqdhaqaaqa qofka caafimaadka qaba. Arrintaas waxaa looga hortegayaa in cudur side aan calaamadaha cudurka laheyn uu dadka kale qaadsiiyo. Go’aanka karaantiilka waxaa lagu saleeyay sharciga cudurada faafa.

Wakhtiga karaantiilka

Wakhtiga uu karaantiilku qaadanayo waxaa laguu sheegayaa marka karaantiilka lagu geliyo. Karaantiilku wuxuu inta badan qaataa 10 maalmood oo ka billaabanaysa xaaladdi u dagnaanshaha cudurka ee dambaysay. Karaantiilku wuxuu qaadanayaa labo todobaad marka ay jiraan xaalado ah in qofka uu cudurku ku dhacay ay dhowr qofood guriga la deggan yihiin. Wakhtiga waxaa laga soo tirinayaa billowga calaamadaha qofka cudurka u jirraday ama maalinta saamiga laga qaaday qofka aan calaamadaha cudurka laheyn.

Sidee wax loo sameynayaa marka karaantiilka lagu jiro?

Inti aad karaantiilka ku jirto waa in aad iska ilaalisaa xiriirada taabashada ee dadka aan guriga kula deganeyn. Wakhtiga karaantiilka waxaad ku qaadanaysaa gurigaada. Bannaanka waad aadi kartaa, haddii aadan dadka kale u dhowaanayn. Ma aadi kartid tusaale ahaan goobta shaqada, dugsiga, xannaano-maalmneedka, hiwaadaha, dukaanka ama farmashiyaha, sababtoo ah goobahan marka la joogo waxaa adag in la iska ilaaliyo xiriirka taabashada ee dadka kale. Marti kuuma imaan karto cuntadana waa in aad dalbataa.

Si caadi ah ayeey u noolaan karaan dadka asxaabtaada ama kuu dhow ee aan xiriir taabasho oo toos ah la laheyn qofka cudurka qaaday. Markaas dadka kuu dhow kuma jiraan karaantiil, marka laga reebo dadka karaantiilka la geliyay. Ehelka ama asxaabta qofka la karaantiilay ee aan calaamadaha cudurka laheyn ma ahan kuwa cudurka laga qaadayo.

Haddii aanay jirin qof cuntada ama daawada kuu soo qaadi karta, waxaad la xiriir kartaa telefoonka diyaargarowga adeegyada sooshalka ee lambarkiisu yahay 09 310 44400.

Calaamadaha cudurka Korona

Toinen linja 4 A	PL 6000, 00099 HELSINGIN KAUPUNKI	Telefoon	09 310 5015	www.hel.fi/sote
Andra linjen 4 A	PB 6000, 00099 HELSINGFORS STAD	Tel.	09 310 5015	www.hel.fi/sote/sv
Toinen linja 4A	P.O. Box 6000, 00099 CITY OF HELSINKI	Tel.	09 310 5015	www.hel.fi/sote/en

Helsinki
Helsingfors

Laanta sooshalka iyo caafimaadku waxay ogeysinaysaa
Social- och hälsovårdssektorn
Social Services and Health Care
Waxaa la cusboonaysiiyay 4.11.2020

246_Tietoa karanteenipäätöksen saaneelle
[somali]

Qaadista cudurka illaa iyo billaabashada calaamadaha cudurku waxay qaadataa 1–14 maalmood, caadi ahaan 5–6 maalmood. Astaamaha cudurka fayruska korona lagu yaqaan waa tusaale ahaan xummad, qufac, madax xanuun, lablabo, shuban, murqa xanuun, dhuun xanuun, hargab, neefta oo adkaata iyo dareenka urta ama dhadhanka oo luma.

Toinen linja 4 A PL 6000, 00099 HELSINGIN KAUPUNKI Telefoon 09 310 5015 www.hel.fi/sote
Andra linjen 4 A PB 6000, 00099 HELSINGFORS STAD Tel. 09 310 5015 www.hel.fi/sote/sv
Toinen linja 4A P.O. Box 6000, 00099 CITY OF HELSINKI Tel. 09 310 5015 www.hel.fi/sote/en

Helsinki
Helsingfors

Laanta sooshalka iyo caafimaadku waxay ogeysinaysaa
Social- och hälsovårdssektorn
Social Services and Health Care
Waxaa la cusboonaysiiyay 4.11.2020

246_Tietoa karanteenipäätöksen saaneelle
[somali]

Sidee ayaan u qabsanayaa wakhtiga baaritaanka fayruska Korona?

Haddii inta aad karaantiilka ku jirto ay kaa soo baxaan xittaa iyagoo fudud calaamadaha kor lagu soo xusay, degdeg u aad baaritaanka fayruska Korona. Waxaad wakhti ka qabsan kartaa baaritaanka fayruska Korona adigoo qiimeynta Koronaha ka samaynaya shabakadda cinwaankeedu yahay Omaolo.fi. ama wacaya rugta talabixinta fayruska Korona, tel. 09 310 10024 (maalin kasta saacadda u dhexeysa 8–18). Marka ay xaalad degdeg ah jirta wac Caawimaadda heeganka, tel. 116 117.

Ogeysiiskan waxaad xittaa heleysaa marka cunuggaada karaantiil la geliyo. Waalid ahaan waxaad wakhti u qaban kartaa cunugga kayar 16 sano adigoo isticmaalaya adeegga Omaolo.fi ama wacaya rugta talabixinta fayruska Korona, tel. 09 310 10024.

Magdhabidda mushaarka la waayay

Mushaarka lagu waayay sababo ka yimid karaantiilka lagu geliyay, waxaa laguugu magdhabayaa sidii lacag maalmeedka cudurada faafa. Waxaa laga codsadaa Hay'adda hawlganka qaranka (Kela). Go'aanka karaantiilka ee uu qoray dhakhtarka magaalada Helsinki u qaabilsan cudurada faafa ayaad heleysaa si aad codsiga ugu lifaaqdo. Go'aanka karaantiilka waxaa si otomaatig ah laguu soo dirayaa isagoo warqad la qoray ama iimayl qarsoon ah. Waa in aad codsiga geeysaa Kela-da labo bilood gudohood oo ka billaabanaysa marka karaantiilka lagu geliyay.

Lacag maalmeedka cudurada faafa waxay si buuxda u beddelaysaa lacagta lagu waayay ka maqnaashaha shaqada ee uu karaantiilku sababay. Lacag maalmeedka qofka shaqeeya waxay waafaqsantahay mushaarki uu qaadan lahaa, haddii uu qofku shaqeyn lahaa. Lacag maalmeedka ganacsaduhu waxay waafaqsantahay dakhli-sannadeedka YEL ama MYEL ee shaqaynaya marka ay ka maqnaashaha shaqadu billaabanayso. Waalidka cunugga kayar 16 sano wuxuu xaq u leeyahay in uu helo lacag maalmeedka cudurada faafa, haddii cunugga la geliyay karaantiil waalidkuna uu arrintaas darteed shaqayn waayay. Macluumaad dheeraad ah waxaa laga helayaa www.kela.fi/tartuntatauti.

Karaantiilka waa in loo hoggaansamaa

Waa qasab in loo hoggaansamo karaantiilka uu amray sarkaalka cudurada faafada. Sida uu qabo sharciga Finland, qofka jebiya amarka karaantiilka ama gooni u haynta waxaa lagu xukumi karaa ganaax ama ugu badnaan xabsi saddex bilood ah iyadoo loo cuskanayo jebiya ilaalinta caafimaadka, haddii xittaa uusan cudurka ku qabadsiin dad kale.

Toinen linja 4 A | PL 6000, 00099 HELSINGIN KAUPUNKI | Telefoon | 09 310 5015 | www.hel.fi/sote
Andra linjen 4 A | PB 6000, 00099 HELSINGFORS STAD | Tel. | 09 310 5015 | www.hel.fi/sote/sv
Toinen linja 4A | P.O. Box 6000, 00099 CITY OF HELSINKI | Tel. | 09 310 5015 | www.hel.fi/sote/en

Helsinki
Helsingfors

Laanta sooshalka iyo caafimaadku waxay ogeysinaysaa
Social- och hälsovårdssektorn
Social Services and Health Care
Waxaa la cusboonaysiiyay 4.11.2020

246_Tietoa karanteenipäätöksen saaneelle
[somali]

Tilmaanbixinno dheeraad ah oo loogu talaggalay qofka karaantiilka ku jira waxay ki jiraan cinwaanka: www.hel.fi/koronavirus

Toinen linja 4 A	PL 6000, 00099 HELSINGIN KAUPUNKI	Telefoon	09 310 5015	www.hel.fi/sote
Andra linjen 4 A	PB 6000, 00099 HELSINGFORS STAD	Tel.	09 310 5015	www.hel.fi/sote/sv
Toinen linja 4A	P.O. Box 6000, 00099 CITY OF HELSINKI	Tel.	09 310 5015	www.hel.fi/sote/en